



Xaashida Xaqiiqda ee Molnupiravir: Daawo loogu talagalay daawaynta COVID-19

(Ee Bukaanka, Waalidiinta & Daryeel bixiyayaasha)

S: Waa maxay Molnupiravir?

Molnupiravir waa daawo loogu talagalay daawaynta cudurka COVID-19-ka fudud ilaa dhexdhexaadka ah. Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka ee Mareykanka (FDA) ayaa markii ugu horreysay oggolaatay isticmaalkeeda Disembar 2021.

S: Yaa qaadan kara Molnupiravir?

Molnupiravir waxaa loogu talagalay dadka leh calaamadaha fudud ilaa dhexdhexaadka ah ee COVID-19 kuwaas oo:

- Da'dooda tahay 18 sano iyo ka weyn,
- Oo laga helay baaritaanka COVID-19,
- Oo halis sare ugu jiraan COVID-19 daran, iyo
- Aan heli karin xulashooyinka kale oo daawaynta ay oggolaatay FDA.

S: Sidee loo qaataa?

Molnupiravir waxaa laga qaataa afka. Qiyasta caadiga ah waa afar kiniin 12 saacad kastaba shan maalmood. Waa muhiim in la dhammeystiro koorsada daawaynta ee 5-ta maalmood ah oo buuxda oo aad sii waddo iskarantiilida marka loo eego talooyinka caafimaadka dadweynaha. Waa inaan la qaadanin wax ka badan shan maalmood.

S: Yey tahay in UUSAN qaadan Molnupiravir?

Molnupiravir **LAGUMA** talinayo bukaanada:

- Urka leh
- Naaska nuujinaaya
- Carruurta

Haddii aad uur leedahay ama aad naas nuujinayso, la tasho daryeel bixiyahaaga caafimaadka ka hor inta aadan qaadan Molnupiravir.

Haddii aad uur yeelan karto, isticmaal hab lagu kalsoonaan karo oo ka hortagga uurka haddii aad qaadan doonto daawadan. **Sii wad ugu yaraan saddex bilood ka dib qiyaasta ugu dambeysa ee Molnupiravir.**

S: Waa maxay waxyeellooyinka ka iman kara Molnupiravir?

Waxyeellooyinka daawadan waxaa ka mid ah

- Shuban-biyood
- Lalabo
- Dawakhsanaan

S: Maxaan LOO isticmaalin Molnupiravir?

Molnupiravir LOOMA isticmaalo:

- Daawaynta ugu horreysa ee dadka u baahan isbitaalka sababo la xiriira jirro daran ama halis ah oo COVID-19 ah
- Kahortagga cudurka COVID-19.

S: Macluumaad dheeraad ah

Haddii aad qabto su'aalo, fadlan la xiriir daryeel bixiyahaaga caafimaadka, booqo weebsaydhka Molnupiravir www.molnupiravir.com ama wac 1-800-672-6372.

Helitaanka dukumiintiga: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. La xiriir Xarunta Warbixinta Caafimaadka ee 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us.